



Warqad Furan oo ku Socoto Waalidiinta Ontario

Waxaanu wax u qornaa sidii waalidiin, barayaal, hoggaanka shaqaalaha, iyo cashuur-bixiyayaasha kuwaas oo ay ka go'an tahay inay ilaaliyaan oo ay horumariyaan waxbarashada dawladdu maalgaliso.

Ontario waxay dhistay mid kamid ah nidaamyada waxbarasho ee ugu wanaagsan adduunka. Waxa ka jira (Ontario) hormar laxaad leh oo keenay in wax fiican ka dhasho marka la eego ardaydeena iyo gobolkeena.

Maarso 15, 2019, Wasiirka Waxbarashada Lisa Thompson, waxay ku dhawaaqday waxa Doug Ford iyo dawladdiisu ugu yeedheen *Himilada Cusub ee Waxbarashada*.

Qorshohoodu wuxuu khatar galinayaa wixii aynu hormar soo samaynay oo dhan.

Qorshohoodu waxa uu taageeri kari waayay oo uu buuxin kari waayay baahiyaha ardayda Ontario. Waa tallaabo laxaad leh oo hoos u dhigaysa carruurteena, mustaqbalkooda iyo dhaqaalaheena badqabkiisa.

Qorshohoodu waxa uu kordhinayaa tirada ardayda fasalka, taas oo si toos ah hoos ugu dhigaysa wakhtiga macallimiintu, barayaashu iyo shaqaaluhu ay u helayaan la shaqaynta carruurta.

Qorshohoodu waxa uu ku khasbayaa ilmahaagu inuu qaato ugu yaraan afar kooras oo onlayn ah, kuwaas oo sidoo kale hoos u dhigaya wakhtiga ilmahaagu haysto ee uu ku dhaxgali karo macallimiinta iyo lodkooda.

Laga bilaabo Xannaanada Carruurta Maalinta oo Dhan ilaa Fasalka 12aad, waxbarashadu waa maalgalin laga helo faa'ido badan taas oo horseedda shaqo wanaagsan, dakhli sareeya iyo degmo caafimaad qabta.

Soo jeedinta dawladda Ford ee ah in la yareeyo guddiyada maamusha dugsiyada waxay ku sii kordhinaysa culays nidaamka waxbarashada ee dawladda maalgaliso. Tani waxay ka dhigan tahay barnaamijyada gaar ah sida kuwa horseedaya xirfadaha, farshaxanka, waxbarashada gaarka ah iyo barnaamijyo kale oo muhiim ah (sida, International Baccalaureate, Meelaynta Sare, ardayda hibada leh, iyo waxbarasho bannaanka ah) waxay khatar ugu jiraan in la joojiyo.

Yarayntan ay ku dhawaaqday dawladda Ford waxa uu ka dhigan yahay in wax yar uu heleyo ilmo kasta oo Ontario joogaa. Waxay keeneysaa in:

- Wakhti yar oo macallimiintu ay ku qaadanayaan fasalka gudihiisa iyo taageerada bannaanka fasalka ee ardayda u baahan caawimaadda iyo tilmaamaha dheeraadka ah
- Waxaa jira koorasyo tiro yar oo ardayda ay kala dooran karaan inta ay ku jiraan nidaamka
- Helitaan yar ee la-taliyayaasha tilmaamaha, kaaliyayaasha waxbarashada, dhakhaatiirta, dhakhaatiirta cilmi-nafsiga, shaqaalaha bulshada, macallimiinta carruurnimada hore, iyo xubnaha kale ee muhiimka ah ee kooxda waxbarashada
- Xirfadlayaal tiro yar ayey dugsiyadu heli doonaan si ay wakhtigooda ugu deeqaan barnaamijyada waxbarashada ka baxsan, naadiyada, iyo kooxaha
- Xirfadlayaal tiro yar ayey heli doonaan ardayda leh baahiyaha gaarka ah

Masuuliyadda dhabta ahi waa in la maalgaliyo waxbarashada ardaydeena. Masuuliyadda dhabta ahi waa in la xaqiijiyo nidaamkeena waxbarasho inuu awoodo inuu siiyo ardayda oo dhan fursad ay ku guulaystaan. Taasi waxay ka dhigan tahay in la maalgaliyo, oo aan wax laga jarin, maalgalinta waxbarashada shacabka.

Waxaanu halkan u joognaa waa ardayda. Waxaanu ognahay inaad adiga laftaadu u joogto.

Booqo websaytkeena www.hereforstudents.ca. Inta aad ku jirto, qaddar yar oo aad fariin ugu dirto MPP-gaaga qaado— u sheeg inaanad taageersanayn kordhinta tirada ardayda fasalka iyo hoos u dhigga barnaamijyada.


Harvey Bischof, Madaxwayne
Ontario Secondary School Teachers' Federation (OSSTF/FEESO)



Sam Hammond, Madaxwayne
Elementary Teachers' Federation of Ontario (ETFO)



Rémi Sabourin, Madaxwayne
Association des enseignantes et des enseignants franco-ontariens (AEFO)



Liz Stuart, Madaxwayne
Ontario English Catholic Teachers' Association (OECTA)

